



Asker
kommune

Qashin-kala-soocid 2011



Kala-sooc qashinka - abuur hanti!

Nagala soo qaybgal mashruucayaga-deegaanka weyn ee deegaan-hoosaadka



Diyaar ma u tahay ka qaybgalka Mashruuca-deegaanka weyn ee deegaan-hoosaadka? Diyaar baan ahay anigu. Waxaan ku faraxsanay inaan bilaabo – iyo anigoo la raba dhammaan dadka Asker ila deggan nasiib wacan!

Waa inaan qirtaa. Waxaan ku fooganahay inaan wax ratibo oo kala sooco. Waxaan kala-soocaa waraaqaha, caagga, dharka, baatariyada la isticmaalay iyo kartoonaada madhan ee caanaha. Haddana diyaar baan u ahay inaan u tafa-xayto qashinka-cuntada!

Sannadkan gudihiisa dhammaan dadka deggan Asker waxa la siinayaa haamo-dibaddeed cusub, iyo waliba anagoo bilaabayna qashin-cunto kala-sooca. Waxaanu qaybinaynaa qoraal sida loo kala-soocayo, sallad-qashin-cunto iyo baco-dabeeciya oo la isticmaalayo, ugu dabayntiina waynu bilaabaynaa.

“Kala-sooc qashinka – abuur hanti”, waa hal-ku-dhegga degmada ee mashruucan. Waan jecelahay! Way qiimo badan tahay in loo isticmaalo khayraadka sida ugu wanaagsan, waxaanaynu kaga qaybqaadanaynaa kijada. Si kaloo ka fudud noqon mayso. Iyo waliba haddii aynu u soo jeedsanno waxaynu isticmaalayno iyo waxaynu tuurayno, iyana waa abaal dheeraada.

Way anfacaysaa. Waraaqaha aynu isticmaalnay haddana waraaqo ayay noqonayaan. Caaggu tusaale

ahaan wuxuu noqon karaa falaas-cabitaan. Cuntada aynu tuurno waxay noqon kartaa gaasta-dabiiciga, si ay basasku uga dhigtaan shidaal, iyo nafaqo dheeraad ah oo ay siiso takaariyada beeraha aad ku aragto tuulooyinkeenna.

Wax badan oo adduunka ka jira ayaynaan waxba ka qaban karin, halkanse waxa inoo bannaan fursad aynu wax wanaagsan ugu qaban karno deegaanka inagu hareeraysan. Waxaan adiga iyo anigu aan ka qabanno guryaha waxay samaynaayan farqi!

Diyaar ma u tahay inaad ka qayb qaadato mashruuca-deegaanka weyn ee deegaan-hoosaadka? Diyaar baan u ahay. Waxaan ku faraxsanay inaan bilaabo – waxaan la rabaa dhammaan dadka Asker ila deggan nasiib wacan!

*Hilde Hummelvoll
Deggan degmada Asker*

Xidhiidhka-warbixinta

Adeegga-guud (Servicetorget): 66 90 90 90 • Xafiiska-dhexe: 66 90 90 00 • Qaybta farsamada degmada: 66 90 90 04.
kildesortering@asker.kommune.no

Degmada Asker, Waaxda farsamada-degmada, Fusdalbråten 4, 1387 Asker

Waxaa kaloo aad isticmaali kartaa arji-internetka si aad u ballansatid ama u bedeshid macmiilka-nadaafadda. Eeg bogga internetka degmada halka ay ku taalo Selvbetjening (isu-adeegu). Halkaas waxaa la dhigay arji-internet oo aad ku ballansatid/ku bedeshid haamaha-qashinka ee ganacsatada. Qoraalkan waxaa loo turjumay af-ingiriisi, af-poland iyo af-soomaali.

Sannadkan gudihiisa waxaad helaysaa haamaha-dibedda ee qashinka cuntada, waraaqaha/karaatoonada/kartoonada-cabitaanka iyo hadhaaga-qashinka

Sannadkan gudihiisa waxaanu ku bedelaynaa kiishka-weyn ee qashinka ee madow iyo kiishka-waraaqda ah ee midabka-liin-macaanta leh kuwo cusub, haamo-dibedeed oo fudud oo caag ah. Tani waxay kuu fududaynaysaa inaad kala-soocdid oo aad kala hagaajisid qashinka dibedda. Midabka daboolka ayaa kuu tilmaamaya nooca qashinka ee lagu ridayo haamaha kala geddisan.



Qashin-cunto



Waqraaq/kar-
toon/kartoon-
cabitaan



Hadhaa-
qashin



Baako-
caag

daboolka-bunniga
daboolka-cagaaran

= Qashin-cuntada
= Waraaqo/kartoon iyo/
kartoon-cabitaan

daboolka dameeriga ah
daboolka buluuga ah

= Hadhaaga-qashinka
= Baakadaha caaga ee 5
guri ama in ka badan.
Xalka wada shaqaynta
intaa ka yar iyo
guryaha kelida ahi
waxay sii wadaayaan
bacihii caddaa sidoodii
hore.



Reinholdt iyo haamaha-dibedda ee cusub

Haamaha cusubi waxay leeyihiin faa'iido badan:

- Haamuhu waxay celinayaan xayawaanka yaryar iyo xayawaanka kaleba.
- Haan la laydhiyay oo qashinka-cuntada ah oo urta ka hortagaysa. Si kastaba ha ahaatee waa inaad haanta dhawr jeer dhaqidid inta waqtiga-xagaaga, amaba haddii loo baahdo. Waxaad si fudud u isticmaali kartaa tuubada-beerta.
- Taayir ka dhigaya hanta inaad si fudud u kaxaysid.
- Iyadoo la joojinayo bacdii-madoobayd ee qashinka. Bacaha hadhaaga-cuntada iyo bacaha-dabiiciga ah ee qashinka-cuntada waa la isku xidhayaa oo waxaa toos loogu ridayaa haanta-dibedda.
- Way fududahay in haanta qiyaasteeda la bedelo haddii aad u baahan tahay xaddi kele.
- Qaab-shaqeedka qashin-qaadaha oo wanaagsanaada iyadoo nabarrada gaadhaa ay yaraadaan iyo culayska la qaadayoba.
- Iyadoo ay u sii fiicnaanayso xagga deegaanka oo 14kii cishaba mar la qaadayo qashinada: cuntada iyo hadhaagaba taasoo keenaysa in la yareeyo qaaditaankooda.
- Haamaha waxa lagu calaaminayaa raad (brikke) elektorooni ah oo hubaal ka dhiga in la faaruqiyo waqtiga saxa ah.
- Waraaqaha iyo kartoonada waxa si fiican la isugu geyn karaa haan halkii bac lagu ridi lahaa.

Xusuuso markaad qashin-kala-sooc aad samaynaysid waxaa u soo baxaya boos haanta-hadhaaga-qashinka!

Si u fiican deegaanka oo qashinka loo qaado

Marka lagu daro baabuurta-qashinka oo ku socota gaasta-dabiiciga ah, waxa nidaam cusub ah in la qaado qashinka cutada iyo hadhaaga-qashinka 14kii cishaba mar meesha ay afar ama in ka yari macmiil yihiin. Sidaas waxaanu uga tudhaynaa deegaanka wasakhaynta, buuqa iyo gaadiid-badnida. Xal wadajira oo shan ama in ka badani waxay helayaan in wiig kasta laga qaado qashinka-cuntada iyo hadhaaga-qashinkaba. Iyadoo la eegayo deegaanka xalalka wadajirku waxay faa'iido u yeelanayaan iyadoo ay yaraanayso goobaha laga qaadayo (qashinku).

Shirkadda Modus arbeidstrening ayaa kuu keenaysa haamaha

Arbeid, Fritid og Avlastning (Shaqo, Firaqada iyo Ka-hayntu) waa deeq degmo oo bixisa shaqo-carbis ama shaqo-barasho dadka sababo kala geddisan u raba. Xarunta-shaqo ee Drengsrud iyo Daleløyken way rakibayaan, Modus-na waay qabinayaan 41 000 oo haamood iyo salladihii qashinka cuntada oo ay ku jirto bacaha-dabiiciga ahi ee dadka deggen Asker. Modus waxay ururinaysaa hayayaasha-bacaha ee gaboobay cidii rabta in laga qaado.

Xal qarinta haamaha dibedda

Nashqadeeye ayaa degmaada Asker ku hawlgelisay inuu soo diyaariyo xalal lagu qarinaldo haamaha dibedda. Tani maaha wax la iska rabo, laakiin waa

Sahal-u-gelidda xagaaga iyo jiilaalkaba

Si qashin-qaaduhu hore ugu riixo haanta gaadhiga-qashinka si uu ugu shubo (qashinka) waxaa muhiim ah in sagxadda iyo agagaarka halkay haantu taalo la hagaajiyo. Halka ay ku habboon tahay waa in la dhigo haanta iyadoo gacanka la qabanayo uu dibedda soo jiro. Haddii dhiri ku wareegsan tahay haanta, fadlan dayactir. Jiilaalka wadada haanta loo maro ha ahaato mid laga hagaajiyay baraf oo quruurux (jay) lagu shubay.

Waad ku mahadsan tiihin caawimada!

soo-jeedin cidii rabta wax sidaas ah. Sawirro faahfaahsan iyo wax badan oo ku saabsan arrintan waxaad ka akhriyi kartaa bogga netka degmada www.asker.kommune.no/kildesortering.

Qashin-qaad elektarooni ah

Haan kasta waxaa lagu xidhayaa raad-elektarooni ah (brikke) iyo calaamad lagu dhajiyo oo leh summada-xariiqyada ee sirta ah taas oo ay tahay INAAN laga fujin. Raad-elektarooniga waxaa la yidhaahdaa RFID (Radio frequency identification). Raadka(brikken) waa la akhriyayaa marka haantaada laga shubo qashinka, si fudud ayaanu ula soconaynaa waxa markii loogu talagalay la qaaday. Markaa haddii aan la qaadin waxa qashin-qaaduhu uu helayaa digniin uu ka arkaayo shaashadda ku rakiban gaadhiga. Nidaamka (RFID) wuxuu u fududaynayaa qashin-qaadaha inuu helo haanta. Haddii aad bedesho halka ay haamahaaga-dibeddu yaaleen way adkaanaysaa in la helo, waxaa muhiim ah inaanu helno fariin. Raadka-RFID kuma jiraan wax war ah oo ku saabsan cidda leh, keliya lambar gaara oo ku xidhiidhinaya haanta nidaamka qashin-qaadidda. Rakibaada waxaa loo samaynayaa marba in waxaana laga shaqaysii-nayaa dhammaantood sannadkan gudahiisa.



Maxay u soo rogaysaa degmada Asker kala soocidda qashinka-cuntada?

Si uun ama qaab kale ayaynu dhammaanteed u qabanaa maalin kasta qashinka. Marka qashin samaysmo ilaa marka dib looga dhigayo alaab cusub, dhammaanteen waxaynu ku leenahay dawr. Waxaynu nahay dad badan oo ay tahay inay wada-shaqeeyaan si khayraadka qashinku u noqdo mid sidii ugu habboonayd looga faa'iidaysto.

Qashinka-cuntada waxaa loo diraa in la gubo si dib-looga-dhaliyo tamar iyadoo lagu daray hadhaaga-qashinka, balse waxay ka kooban tahay qiyaastii 70% biyo oo aan u fiicnayn in la gubo. Siday tahayna si fiican ugama faa'iidaystaan karno nafaqada walxaha ku jira qashinka-cuntada. Markaa sababtaa awgeed waxa faa'iido badan in laga soo saaro gaasta-dabiiciga ah oo tamar laga dhigayo iyadoo la qudhminayo halkii laga gubi lahaa. Waxaa intaa raaca iyadoo laga helayo hadhaa qiimo leh, oo loogu yeedho "hadhaa-dabiici", oo noqonaya bacrimiyaal kala duwan.

Habkan cusubi wuxuu ina siinayaa fursad aynu ugu dhawaano habka waxa iyo inta aynu tuurayno – iyo inagoo rajayna sababtaa awgeed inaynu kor u qaado baraarugga taas oo sababta in aynaan tuurin wax si fiican loo isticmaali karo, cunto la cuni karo iyo wixii la mida si fudud sidii markii hore la yeeli jiray. Tani markeeda waxay keenaysaa isticmaal yari, taasoo u fiican in la daryeelo khayraadka dhulka.

Ma ogtahay...

- Baadhitaan ayaa sheegay kala badh waxa aynu ku ridno bacda madow ee qashinku inuu yahay cunto.
- Boqolkiiba 25 cuntada aynu iibsanno inaynu tuurno.
- Qof kastoo Asker degaa inuu soo saaro qashin-guri ku dhow 440 kg sannadkii. Waa in ka badan 20 kg celceliska-wadanka.
- Mid kastoo inaga mid wuxuu kala-soocaa:
 - 74 kg oo waraaqo ah
 - 28 kg oo quraarad iyo bir ah
 - 6 kg oo baakado-caaga
- Tixraaca xisaabintan waxay isugaynta qashinka ee Asker samaynaysaa gaas-dabiici oo 8-10 gaadhi-qashin sannadkii
- Gaas-dabiici shidaal ahaani waxay ina siinaysaa hawo nadiif ah, buuq yari wax saamayn ah kuma laha cimilada.

Ujeedooyinku waa...

- Sida ugu fiican in looga faa'iidaysto khayraadka.
- In si fiican loogu oggaado inta qofku qashin uu soo saaro.
- In la yareeyo qashin-soo-saaridda gurigiiba in ka hoosaysa celceliska-wadanka sannadka 2015.
- Ugu yaraan boqolkiiba 65 qashinka-guryaha in la kala-sooco iyo in dib-loo-warshadeeyo. Inta soo hadha boqolkiiba 3 oo keliya ayaa la gayn godka. Inta kale oo dhan waxa dib looga dhigi tamar!

*Qashin-kala-sooca 2011
- mashruuc-deegaan oo wayn ee
deegaan-hoosaad!*



Xalalka-qashin-kala-sooca gudaha

Waxa jira xalal badan oo fiican oo jaban oo qashin-kala-sooca guriga. Si ay u fududaato waa muhiim inaad xal u hesho ku habboon adiga iyo gurigaba.

- Sanduuq-kaydiye waa fiican yahay in loo isticmaalo wixii qalalan ee boos weyn raba sida qashinka waraaqaha/kartoonka, dhalooyinka- iyo baakadaha-birta iyo caagadaha rahmaada.
- Isticmaal waxaad hore guriga ugu haystid: sallado, jalxado, haan, khaanad-kabo, katabaan iyo wixii la mida.
- Baaldi caadi ah waa la isticmaali karaa.
- Xalalka qaar waa in aad sudho albaabka-khaanada.
- Xalalka qaar waxay leeyihiin marin loo rakibo si aad u jiidid haanta gudo iyo dibedba si fudud.
- Haddii aad qorshaynaysid kijo cusub waxaad qiimayn kartaa qaab loogu talagalay khaanadaha kijada ama miiska kijada oo hoos loo dhigay.

Fiirso in salladda-qashinka-cuntadu ay habboon tahay inay hawo hesho haddii aad rabto inaad isticmaasho mid aan ahayn tii lagu siiyay.



Tusaalayaal dhawra iyo kuwa iibiya xal noocyo kala duwan waxaad ka helaysaa boggayagan netka www.asker.kommune.no/kildesorteting



Dadaal u samee deegaan wanaagsan – maalin kasta!


Diyaargarowgii ugu danbeeyay - waxaanu u baahan nahay caawimadaada

Calaamad-dhajis

Qoraalkan waxa la socda oo lagu siiyay laba calaamad-dhajis. Labada calaamadoodba waxa lagu dhajinayaa daboolka kiish-hayihii hore. Haddii aad u baahan tahay calaamad-dhajis kale, la soo xidhiidh Servicetorget.



Calaamada mid ahaan waxaad ku qoraysaa cinwaanka-guriga waxaanad ku dhajin daboolka. Tani caawimo fiican ayay noo tahay marka haamaha cusub la dhigayo. Xusuuso in si cad loo garto lambarka gurigu inay muhiim u tahay arrintan.



Calaamada kale waxaad ku dhajinaysaa daboolka, keliya haddii aad rabto in degmadu kaa qaado hayaha (stativet).

Urrurinta kiish-hayayaasha hore

Hayaha adigaa iska leh, laakiin haddii aad rabto in Modus kaa qaado hayaha-kiishashka, waxaad ku dhajinaysaa calaamad-dhejiska ay ku qoran tahay "Vi ønsker at dette sekkestativet skal samles inn av Asker kommune." ("Waxaanu rabnaa in hayaha-kiishkan ay urruriso degmada Asker"). Qaadida qashinka ee bacaha madow waa la joojinayaa marka nidaamka-qashin-kala-soocu cusubi bilaabmo. Miyaad qashin ku haysaa bacda madow markii hayayaashii hore la urruriyay? Waxaanu ku wareejinaynaa haan cusub oo xal kala-guur ah ilaa marka la gaadhayo qashin-qaadida ugu horraysa ee nidaamka cusub.



Ka dib markaad hesho haamaha cusub, waxaa la qaadayaa kiish-hayayaasha ee hore marba intii calaamad-dhejiska samaysa. Dhig qalabka la qaadayo xagga hore si ay u fududaato in si dhib yar loo helo. Adeegani wuxuu quseeyaa meesha la dhigo haamaha-qashinka iyo dhammaan noocyadii hore ee kiish-hayayaasha iyo haamaha, maaha keliya noocan sawirka-sharaxaada. Kiish-hayayaasha la urruriyo waxaa loo dirayaa dib-u-warshadayn.

Qalab-bilow - waxaanu kaa caawinaynaa bilowga

Dhammaan guryaha waxa la siinayaa qalab-bilow oo wata warbixin fududayd ka dhigta in la bilaabo qashin-kala-sooca. Qalab-bilowga waxaad helaysaa marka haamaha-dibedda la keeno halkaad degen tahay. Waxaana la dhigayaa albaabkaaga hortiisa. Ku ballami jaarkaaga inuu kuu qaado haddii aanad guriga joojin.



Qalab-bilowgu wuxuu ka kooban yahay:

- Sallad-qashin-cunto (7 litir)
- Laba duub oo min 80 baco-dabiici ah (8 litir), una dhiganta qiyaastii in sannad la isticmaalo. Kuwan waxa laga sameeyay dheecaan-gallay taasoo ah walax baaba'da.
- Qoraal ku saabsan kala-soocidda.
- Calaamad-dhajis oo lagu calaamadinayo haamaha-qashinka ee gudaha.
- Jadwal cusub oo 14kii cishaba mar la qaadayo qashinka cuntada iyo hadhaagaba.

Sidan ayaad u helaysaa bacaha-dabiiciga

Markay yar tahay xalka wada shaqayntu iyo guryaha kelida ah waxa la siinayaa bacaha-dabiiciga sannadkiiba mar. Haddiiba ay bacuhu kaa dhammaadaan, waa lagu siin kuwo kale adigoo ku guntaaya bac-dabiici ah haantaada-qashinka. Qashin-qaadaha ayaa markaa kuu dhigaaaya duub cusub. Haddii aad xal la wadaagto shan qof ama in ka badan, bacaha-dabiiciga ah waxaad ka soo qaadan Adeega-guud ama dukaamada-cuntada qaarkood. Bogga netka degmada waxaad ka helaysaa liisto dukaamada ay khusayso. Waxaa kaloo aad la xidhiidhi kartaa Adeega-guud wixii warbixin ah ee ku saabsan arrintan. **Fiiro gaara!** Bacaha-dabiicigu waa wax bisil waxay ku habboon yihiin sallad la laydhiyay iyo haan-dibedeed hawo la siiyay.

Xal wadajira

Haddii aad deggen tahay borettslag ama goob guryuhu isu dhow yihiin xalka wadajirka ayaa sida caadiga ah la door bidaa. Kharashka si isleeg ayaa loo qaybsadaa; Degmadu ma eegayso qofkee ayaa inta badan/yar soo tuuray xalka noocaas oo kale ah. Guud ahaan kharash-bilicdu wuxuu noqonayaa mid hooseeya marka loo eego guri keliya. Xalalka jira ee wadajirku waxay u baahan yihiin oo keliya inay si ujeeddo leh u yareeyaan xaddiga hadhaaga-qashinka sababtoo ah qashinka-cuntada waa laga soocayaa hadda.

Xal dhul-ku-aasid

Borettslag-yo (guryo-wadaag) badan iyo wada-leyda (sameier) ee Asker waxaay go'aansadeen inay sameeyaan dhul-la-qodo oo dhex u ah oo qashinka la dhigo. Guud ahaan qaabkan meel-hoose-wax-ku-urrurintu wuxuu kaa rabaa dhul yar marka loo eego sida caadiga ah ee haamaha loo qorsheeyo. Waxay ku habboon tahay borettslag-ga ama wada-leyda halkaas oo dhulku yar yahay dhismayaashuna isu dhaw yihiin. Xalka dhul-ku-aasidda waxaa la qaadaa qashinka-cuntada iyo hadhaaga-qashinkaba toddobaad kasta.

Macmiil-xagaa

Kuwa u baahan nadaafadda bilaha xagaaga waxaanu u haynaa wax aanu ugu yeedhno macmiil-xagaa. Waxayna qusaysaa xilliyada 15ka april ilaa 15ka oktoobar. Kharashka-bilicdu wuxuu noqonayaa kala badh, lacagta joogtada ah iyo ta isbedeshaba ee lagu xisaabiyo xaddiga (qashinka). Ka akhri warar dheeraad ah oo ku saabsan kharashka-nadaafada bogga ugu danbeeya.

Faras-magaalka Asker

Sababo la xidhiidha boos yaraan faras-magaalaha Asker waxa qashinka halkaas laga qaadayaa saddex cisho toddobaadkiiba. Markaa dadka deggen faras-magaaluhu waxay ku xisaabtami doonaan haan-muggeedu intaa lagu qiyaaso. Kharashka waxa lagu xisaabinayaa inta hadhaa-qashin ee toddobaadkiiba, taasoo ah 3 x haanta-muggeeda.

Bilicda-jasiiradda

Waxaa loo sameeyay hab gaara bilicda-jasiirada. Cidda ay khusayso tani boostada ayay waraaq ka heli doonaan. Eeg sidoo kale degmada boggeeda netka.

Macaamiil-ganacsato

Ganacsatadu waxay heshiis la geli karaan degmada Asker, kaas oo ku saabsan ururinta qashinka haddii uu qashinku yahay mid ka kooban oo ku habboon degmada Asker qorsha-qaadidda ee qashinka guryaha. Eeg bogga netka ee degmada wixii war ee dheeraad ah.

Hab cusub - Sharci cusub

Markaad bilaabaysid qashin-kala-sooca qashinka-cuntada, maalinta lagaa qaadayaa waxay noqonaysaa mid la mida sidii hore, laakiinse ah qaadis 14kii cishaba qashinka-cuntada iyo hadhaaga-qashinka xalka wadajirka tirada yar iyo guryaha kelida.

- Qashinka-cuntada iyo hadhaaga-qashinka waxa la qaadayaa 14kii cishoba mar kuwa deggen guryo xal wadajirka yar iyo guryaha kelidooda ee haamaha 2-da taayir leh.
- Xalka wadajirka ee haamaha 4-ta taayir leh ee hadhaaga-qashinka waxa la qaadayaa toddobaadkiiba mar.
- Hadhaaga-qashinkaagu haddii uu yar yahay, waxaad naga codsan kartaa inaanu 4-tii toddobaadba mar qaadno. Qashinka-cuntada isaga mar kasta 14-kii cishaba mar baa la qaadayaa.
- Inta ugu badan ee la riixi karo haanta 2-taayiraydu waa 10 mitir, iyo 5 mitir oo ah haanta 4-taayirayda.
- Isla mar ahaantaa waa la dhigi karaa haanta 2-taayirayda ilaa 30 mitir in u jirta halka uu istaagayo gaadhiga-qashinku iyadoo la bixinayo kharash dheeraad ah. Arrintan waa in degmada loo sheegaa. Haddii aad sheegtay markii aad dooranaysay haanta xilligii-dayrta, uma baahnid inaad mar kale sheegto.
- Haamaha waxa la dhigayaa cinwaanka la gudbiyay. Haddii aanad cinwaanka gudbin, waxaa la dhigayaa halka ay yaalaan kiish-hayayaashii hore ee hadda yaala.
- Haamaha waxa la dhigayaa meel si fiican looga arko, sagxadda iyo harreeraha halka ay yaalaan waa inay hagaagsanaato si qashin-qaaduhu uu hore ugu riixo haanta dhinaca gaadhiga-qashinka – xagaa iyo jiilaalba.
- Maanta laba macmiil miyaad leedahay, waxaad helaysaa laba haamood si atomaatik ah oo loogu talagalay xalka caadiga ah haddii aanad wax kale ballansan.
- Macmiil keliya haddii aad leedahay, laba bacoognaad maanta haysatid, waxaad helaysaa hal bushqad oo keli ah oo wata haan loogu talagalay xalka caadiga ah haddii aanad wax kale adigu ballansan.
- Weli waa suurto gal in la dhigto baco – buluug ah oo dheeraad haddii mararka qaar ay kugu bataan hadhaaga-qashinku. Kiishashka waxaad ka iibsanaasaa Servicetorget, Shellstasjon-nada ama Yggeset avfallspark (rugta-qashinka).
- Ma u baahan tahay dhawr sallad-qashin-cunto iyo baco-dabiici, tusaale ahaan dadka guriga aad ka kiraysay, waxaad ka soo qaadanaysaa Servicetorget.

Goorma ayay kuu bilaabmaysaa adiga?

Fidinta qashin-kala-sooca wadata gooni-u-saarka qashinka-cuntadu wuxuu kuu bilaabmayaa isla marka aad hesho haamaha cusub. Taas oo loo qaybinaayo aag-aag, qorshaha loogu talagalayna waa sidan:

Gu'ga

Aagga 1aad

Xilliyada laga bilaabo badhtamaha maarso ilaa badhtamaha maay

Xagaa

Aagga 2aad

Xilliyada laga bilaabo badhtamaha juun ilaa badhtamaha agost

Dayrta

Aagga 3aad

Xilliyada sebtember iyo oktoobar.

Aagga uu ku yaal cinwaankaagu waxaad ka helaysaa jadwalka-qashin-qaadka ee la soo diray dayrtii 2010ka, haddii kale eeg bogga netka.

Qaybinta haamuhu way ka leexan kartaa qorshihii loogu talagalay. Uma baahnid inaad wax kale samaysid haddiiba ay dhacdo — aan ka ahayn inaad sii wado nidaamkii hore ee kiish-qashinka sidii hore.

Sida ugu dhakhsaha badan u soo sheeg haddii aad rabtid haan aan ahayn mugga caadiga ah, ama haddii aad wax ka bedelayso dalabkaagii hore. Waxaad samayn kartaa sidan adigoo adeegsanaya arjiga-netka ee Isu-adeegga "Selvbetjening" ee bogga netka degmada, ama inaad la xidhiidho Servicetorget.

Xalka caadiga ah waxa la siin guri kasta saddex haa mood:

- Mid 140 litir oo cuntada ah
- Mid 140 litir oo hadhaaga ah
- Mid 240 litir oo waraaqaha/kartoonada/kartoonada-cabitaanka ah
- Kiishka-caaga oo lagu rido baakadaha caaga ah sidii hore ayaa loo isticmaalayaa

Haddiiba la arko in haan yar lagu siiyay, fadlan warka sii Adeegga-guud sida ugu dhakhsaha badan. Waanu saxaynaa markaa sida ugu dhakhsaha badan ee aanu u haleelno.



Sideed samaysaa?

Nidaamka cusubi wuxuu kuu bilaabmayaa adiga marka aad hesho haamaha-dibedda ee cusub. Inta la gaadhayo taas, waxaad u sii wadi sidii hore.

Qashinka-cuntada waxa lagu ridayaa baco-dabiici ah. Waxa lagu siin sallad-qashin-cunto iyo baco-dabiici ah oo gudaha aad ku isticmaasho. Bacda-dabiiciga ah waxa lagu ridayaa haanta-dibedda ee leh daboolka BUNNIGA ah iyo calaamadda qashinka-cuntada.

Qashinka inta soo hadhay waxaad ku ridi bacda-caadiga ah sida dadka intiisa badanba ay maanta ugu ridaan. Bacaha hadhaaga-qashinka waxa lagu ridayaa haanta-dibedda ee leh daboolka DAMEERIGA ah iyo calaamada hadhaaga-qashinka.

Xusuuso inaad gunnudo bacda intaanad ku ridin haanta-dibedda!

Waraaqaha iyo kartoonaada si toos ah ugu rid hanta-dibedda ee leh daboolka CAGAARAN iyo calaamadda waraaqaha. Kartoonaada-cabitaanka dhaqdhaq, kala bixi oo isku-gudo-rid ka hor intaanad ku ridin bacda ku jirta hanta dibedda. Xaddi yar oo baakado-kartoonna oo la kala bixiyay waa la dhinac dhigi karaa hanta.

Baakadaha-caaga waa lagu ridi karaa bacaha caadiga ah, nidaamka bacda muuq-ma-qarisadu sidii hore ayuu u soconayaa. Duub-baco ah waxa lagu siin san-nadkiiba hal mar.

Haddii aad ka tirsan tahay koox weyn oo wada-shaqaysa, waxa suurtoagal ah inaad haysataan ama laydin siiyo haan-dibeddeed oo lagu rido bacaha. Bacda waxa lagu ridayaa hanta-dibedda ee leh daboolka BULUUKIGA ah iyo calaamadda baakadaha-caaga.

Sidan ayaa qashinka loo kala-soocay, loo urruriyay oo loo habeeyay. Markaynu qashin-kala-soocayno waxaynu samaynaa inaynu haysanno khayraadka oo aynu dib u isticmaalno oo aynu xaddidno baahida alaabta caydhin ee cusub.



Qashin-cunto



Hadhaa-qashin



Waqraaq/kartoon/kartoon-cabitaan



Baako-caag



Qashin-qaade 2-khan leh: Marka la urrurinayo waxa bacaha qashinka cuntada iyo hadhaaga-qashinka lagu ridayaa isku gaadhi, lakiin mid walba khan gooni ah.



Qashin-qaade 2-khan leh: Marka la urrurinayo waxa kiishashka ay ku jiraan baakadaha-caaga ah iyo haamaha-waraaqaha qaadaya isku gaadhi, laakiin mid walba khan gooni ah.

- Qashinka-cuntada iyo hadhaaga-qashinka waxa la qaadayaa 14kii cishaba mar waana xalka caadiga ah.
- Xalka wadajirka waxa la qaadayaa toddobaadkiiba mar.
- Hadhaaga-qashinku hadduu yar yahay waxaad weydiisan kartaa in 4tii toddobaadba mar la qaado.
- Waraaqaha/kartoonada/kartoonada-cabitaanka iyo baakadaha-caaga waxa la qaadayaa 3dii toddobaadba mar.
- Jadwalka-qaadidda ee leh taariikhda-qaadidda ee noocyada qashinka kala duwan waxa mar lala qaybinayaa haamaha.



Sidan ayaad u xisaabin kartaa kharashka-guud ee bilicda ee nidaamka cusub

Hadhaaga-qashinku waa inta soo hadha marka dhammaan wixii dib-loo-warshadayn karo ee qashin ah la sooco. Kharashka nidaamka cusub waxa loo habeeyay si ay isu bixiso in xariif lagu noqdo qashin-kala-sooca. Yaraynta xaddiga hadhaaga-qashinku waxay keenaysaa in kharashka guud uu noqdo mid hooseeya. Kharashka waxa loo qaybiyay qiime-joogto ah iyo qiime-isbedesha.

- Qiime-joogtada ah, kr. 1335 lana socoto cashu-urta dheeraadka ah, waxay hubaal ka dhigaysaa in dhammaan macaamiishu ay wada bixiyaan in ka mida kharashka lagu wado bilicda Asker.

- Qiime-isbedela waxa la xisaabin mugga iyo xalka ee hadhaaga-qashinka. Qiimaha litirka ee haanta 2-taayirlyadu waa kr. 14,29 lana socoto cashuurta dheeraadka ahi. Qiimaha litirka ee haanta 4-taayirlyadu waa kr. 13,50 lana socoto cashuurta dheeraadka ahi.

Tusaale 1:

Macmiisha-caadiga, hal guri oo leh 140 litir oo hadhaa-qashin ah

| | |
|--|-------------------|
| Qiime-joogto ah lana socoto cashuurta dheeraadka ahi | kr 1.335,- |
| + Qiime-isbedela: 140 litir x 14.29 kr/litir ee hadhaaga-qashinka: | kr 2.000,- |
| = Isugeynta-kharash | kr 3.335,- |

Tusaale 2:

Wadashaqayn 2 guri oo leh 140 litir oo hadhaa-qashin:

| | |
|--|-------------------|
| Qiime-joogto ah lana socoto cashuurta dheeraadka ahi | Kr 1.335,- |
| + Qiime-isbedela: 140 litir x 14.29 kr/litir ee hadhaaga-qashinka/2 guri | Kr 1.000,- |
| = Isugeynta-kharashka gurigiiba | Kr 2.335,- |

Waxa laga afeefanayaa in la bedeli karo qiimaha-bilicaynta ee kama-danbaysta ah marka siyaasiyan loo eego gu'ga 2011ka. Tusaalayaal badan iyo faahfaahin dheeraada oo ku saabsan kharashka bilicaynta ka akhri bogga netka ee aanu leenahay.



Tartan-su'aalo

Ka qayb-qaado qori-tuurka abaalmarinno fiican! Jawaabaha oo dhan waxaad ka helaysaa war-qoraalkan

1. Intee in le'eg ayaad cuntada aad soo iibsato aad tuurtaa?
2. Waa side midabka daboolka hanta-waraaquhu?
3. Immisa kilo oo qashin-guri ah ayuu tuuraa qof kasta oo Asker deggeni celcelis ahaan sannadkii?
4. Goorma ayuu kuu bilaabmayaa nidaamka cusubi?
5. Maxaa laga sameeyay gaasta-dabiiciga ah?
6. Maxaa loo soocayaa qashinka-cuntada?
7. Maxaa loo haysanayaa haamo oo loo haysan waayay kishash?
8. Immisa haamood ayaa dibedda la dhigayaa, yaase dhigaaya?
9. Maxaa lagu siticmaalaa gaasta-dabiiciga ah?
10. Waa maxay RFID?
11. Waa maxay hadhaaga-qashinku?
12. Maxay noqon kartaa baakadda-caaga ee aynu qashin soocnaa?
13. Waa maxay ujeeddada loo kala saarayo qashinka-cuntada iyo hadhaaga-qashinka looguna qaadaa isku gaadhi?
14. Magacii ka ku sawiran bogga 3aad ee haamaha la joogaa?

Abaalmarinta 1aad: Kala-doorasho xal-qashin-kala-soocid oo kijada ah ama kaadh-hadyadeed Asker Kulturhus - qiimihiiisu yahay kr 1.000,-

Abaalmarinta 2aad: 4 tigidh oo hoolka-dabaasha Risenga - qiimihiiisu yahay kr 500,-

Abaalmarinta 3aad: Bakhtiyaa-nasiib Flaxlodd - qiimihiiisu yahay kr 250,-

Waxa jawaabta la soo dirayaa ilaa 28ka maarso 2011 kuna hagaaji lene.stensland@asker.kommune.no ama Asker kommune, Kommunalteknisk avdeling v/Lene Stensland, Pb.353, 1372 Asker.